

House of Elders extend the term of office of the House of Representatives by a period of 2 years and 27 days, and have, at the same time extended their own term for another 3 years.

Golaha Guurtida Somaliland oo Wakhtigii u kordhiyay Golaha Wakiiladda.

06 April 2013

Source: <http://somalilandparliament.net/index.php/component/content/article/67-news-a-events/218-golaha-guurtida-somaliland-oo-wakhtigii-u-kordhiyay-golaha-wakiiladda>

Golaha Guurtida Somaliland ayaa Fadhi aan caadi aheyn oo ay maanta xaruntooda Magaaladda Hargeysa ku yeeshen ayaa wakhtigii Golaha Wakiiladda u kordhiyey, kuwaas oo ku beegay Maalinta ay dhici doonto Doorashadda Madaxtooyadda Somaliland, isla markaana u kordhiyey 2 sanno, bill iyo 27 cisho.

Golaha Guurtida Somaliland ayaa Ogolaanshaha mudo kordhinta Wakiiladda ee ay ku Meelmariyeen fadhigoodan maanta ayaa waxa kale oo kulankoodaas ku buuxiyeen Jagada Gudoomiye ku Xigeenka Koowaad ee Golahoodaas, oo bannaaneyd ka dib geeridii ku timi Alle ha u naxariistee Sheekh Axmed Nuux Furre.

Fadhigan maanta oo ay ka soo qeyb galeen 71 mudane ayaa waxa ugu horeyba halkaas ka hadlay Gudoomiya Golaha Guurtida Saleebaan Maxamuud Aadan, waxaana uu sheegay in fadhiga maantu uu ka kooban yahay Ansixinta warqad soo jeedin ah oo uu Madaxweynuhu Golaha u soo diray 8/4/2013, oo ku saabsanayd ogolaanshaha muddo kordhin loo sameeyo Golaha Wakiilada iyo Buuxinta Jagada Gudoomiye ku xigeenka koobaad ee Golaha Guurtida.

Kadib hadalkii gudoomiyaha, waxa la bilaabay in la gudo galoo qodobada maanta u yaalay Golaha iyada oo lagu bilaabay in Golaha loo akhriyo Warqad uu Madaxweynu u soo gudbiyey Golaha taas oo uu ku soo jeediye in muddo kordhin loo sameeyo Golaha wakiilada isaga oo Goluhu ka maraayo waajibaadkiisa Distooriga ah. Waxa warqadaas Golaha u akhriyay Gudoomiye Ku xigeenka Labaad ee Golaha Guurtida Siciid Jaamac Cali, waxaanay u dhigneyd sidan:

“ Mudanayaal aniga oo tixraacaaya go’anka Komishanka Doorashooyinka Qaranka ee summadiisu tahay 319/2013 kuna taariikheysan 6/4/2013 ujeedadiisuna tahay Doorashada Golaha Wakiilada Jamhuuriyadda Somaliland.

Waxaan Mudanayaal iduin soo jeedinaya inaad ka gudataan xilkiina Distooriga ah ee ku xusan qodobka 42 ee Distorka Jamhuuriyada Somaliland. Allaa Mahad Leh.”

Ka dib markii Golaha loo akhriyay Warqadii Madaxweynaha ka timi, waxa la gudo galay in la ogolaado soo jeedintaas Madaxweynaha waxaana si aqlabiyad ah ugu codeeyay 71 kii mudane ee maanta ka soo xaadiray fadhigaas. Taas oo sheegaysa in Golaha wakiilada loo kordhiyay muddo ah 2 sanno, bill iyo 27 cisho. Waxa koloo Golaha Guurtidu ay isu kordhiyeen muddo saddex sanno ah.